

Somali

**Dugsiyada Dadweynha Seattle**  
**SHARCIYADA QALIN-JABINTA LOOGA BAAHAN YAHAY DUGSIGA SARE**  
**FASALAKA 2014**

**AGAASIMAYAASHA GUDIGA SARE DUGSIYADA**  
Peter Maier, Degmada I  
Sherry Carr, Degmada II  
Harium Martin-Morris, Degmada III  
Michael DeBell, Degmada IV, President  
Kay Smith-Blum, Degmada V  
Steve Sundquist, Degmada VI, Vice President  
Betty Patu, Degmada VII

**KU-SII MEELGAARADA AGAASIMAHA GUUD**  
Dr. Susan Enfield

**Si aad u qalin-jabiso, una hesho shahaadada waxaa laga doonayaa in aad haysato lixda qodob ee hoos ku qoran:**

**1. DHICHAHA UGU YAR WAA 20**

Ka fiiri bogga 2aad sida ay u kala baxsan yihiin dhibcahaas. Dhibacaha layska doonayo waa kuwa ugu yar marka loo eego wadarta fasalada qalin-jabinta iyo dhibacaha maadooyinka oo kala duwan muhiimka ah. Si aad diyaar ugu noqoto arimahan shaqada iyo jaamacadaba, waxa degmada ku dhiirigelinayaa ardaydu in aya qaataan maadooyin ka badan kuwa looga baahan yahay. Dugsiyada qaar ka mid waxay ardayda ku xiraaan dhibco ka badan 20ka dhibcood in lagu qalin- jabiyo. La soo xariir La-taliyaha dugsiga dhibcaha layska rabo.

**2. ISKU CELCELINTA DHIBCAHA BUUNDADA WAA 2.0**

Ardayda Dugsiyada DEDWEYNAHA Seattle waa in ay haystaan 2.0 ama wixii ka sareeya isku celcelinta buundada iyo 2.0 ama wixii ka badan fasalada muhiimka ah (sida maadooyinka Ingriisiga, xisaabta, taariikhda, iyo sayniska). Fiiri Siyaasada Agaasinka Gudiga Sare Dugsiyada qodobka C 15.00.

**3. IMTIXAANKA GOBOLKA- U LAHAASHAHA AOOONTA IMTIXAANKA DUGSIGA SARE**

Fasalka 2014ga. Ardayda waxa looga baahanyahay heerka, qoraalka, akhriska, iyo xisaabta oo ku salaysan imtixaanka gobolka oo uu gobolku ansixiyo bedelkiisa ama loo casriyeeyo ardayda qaadata waxbarashada gaarka ah.

**4. DHAMAYSTIRKA MASHRUUCAN**

Gobolku waxa uu ardayda ka doonayaan in ay dhamaystiraan qorshaha arimahan oo dhan si ay u helaan shahaadada dugsiga sare. Adaydu waa in ay soo bandhigaan aqoontooda wax akhris, qoraal , wax-alif, iyo joogtayta aqoontaas. Waxa laga yaabaa in ardayda la weydiyo in ay qoraan warqad cilmi baadhis ah iyadoo ay la shaqaynayaan caawiyayaal jooga iskuulada ama jaaliyada, markaana u soo gudbiyaan jaaliyada ama koox gudi oo jooga iskuulada. Waxay ardaydu soo ururinayaan macluamadkii ay ka heleen cilmi baadhista oo ay u soo ururinayaan sidii boortafooliyo. Ikuuladuna way ku kala duwan yihiin sida loo samaynayo boortafooliyahan

**5. QORSHAHA DUGSIGA SARE IYO WIXII KA DAMBEEYA**

Gobolku waxa uu doonayaa in dhamaan ardaydu dugsiga sare leeyihiin qorshaha waxbarashada dugsiga sare iyo wixii ka dambeeyey. Dugsiyada Dedweynaha Seattle waxaa laga rajeenayaa ardayda soo gelaya fasalka 9aad qorshe 5 sano ah oo ka mid ah tahay 4 sano dugsiga sare ku jiro iyo sanadka ku xigo. La-taliyaha dugsiga wuxuu ka cawinayaa ardayga si gaar-gaar ah qorshahaan. Wixii akhbaar ah ee dheeraad waxaad ka helayaa: <http://www.k12.wa.us/GraduationRequirements/Requirement-HighSchoolBeyond.aspx>.

**6. SHAQO BARASHO**

Dugsiyada Dedweynaha Seattle waxay ardayda ka doonaysaa in ay sameeyaan 60 saacadood oo shaqo barasho ah in taanay qalin-gebin waxaana loogu talagalay in ardaydu adeegsadaan aqoonta xirfadooda iyo cilmiga nolosha dhabta. La xariir si gaar ah dugsiga si aad u hesho akhbaaro gaar ah, dugsiyado way kala duwan yihiin.

**DUGSIYADA DADWEYNAHA SEATTLE  
SHARDIGA U YAR EE DUGSIGA SARE LAGU QALIN-JEBIYO**

MAADO	DHIBCO <sup>1</sup>	MAADOOYINKA SHARDIGA AH	XUSUUSNOW
Ingaliiska/ Luqada Ingaliiska	3.0	Horu-dhaca Suugaanta & Curiska Naxwaha 9A, 9B  Sugaanta Aduunka iyo Curiska Naxwaha 10A, 10B  Sugaanta Mareekanka iyo Curiska Naxwaha 11A, 11B	Maadooyinka ardayda ee fasalka 11 <sup>th</sup> waxaa lagu badali karaa maadada Luqada Ingaliiska AP iyo Curiska Naxwaha 1 & 2 ama IB Luqada iyo Suugaanta 11A & 11B ama IB Suugaanta 11A & 11B.
Cilmiga Bulshaha (Taariikhda)	3.0	Taariikhda Aduunka 1, 2, 3  Taariikhda U.S. ee 11A, 11B  Dowlada Mareekanka  Taariikhda Gobolka Washington <sup>2</sup>	Ardayda waa in ay dhameeystiraan fasalada sal-dhiga u ah qiimeeynta horumarka OSPI ee cilmiga bulshada fasalka koow-iyto-bonaadka ama fasalka labo iyo tobanaadka.
Xisaabta	3.0	Al-jabra I  Jometrikada  Al-jabra II* ama maadooyin ka sareey oo ku xigga	*Ardayda waxay dooran karaan in ay qaataan dhibcaha xisaabta oo loo ansixiyey raacsana qaabka xirfada shaqada, si ay ula kulmaano qalin-jabinta looga baahan yahay ee Al- jabra II, laakiin waxaa laga rabaa ogolaashaha oo ansixiyey waalidka/wakiilada iyo maamulka dugsiga sare. U badalka ogolaashaha la ansixiyey waxaa ka mid ah Financial Algebra, Applied Math 2, 3, iyo 4, and Principles of Engineering. Fiiri akhbaaraha dheeraadka ah oo la xariira Xisaabta Sanadka Seddexaad.
Sayniska	2.0	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo	“labada darajo ama dhibcood ee sayniska waa in uu mid ahaado saynis shaybar wata” WAC 180-51-060.
Barashada Shaqada	1.5	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo	Dhibcaha Waxbarashada Shaqada waxaa ka heli kartaa Maadooyinka Baarista ama qabanqaabin fasalada xirfada CTE kuwa kale lagu ogol yahay oo aan aheeyn qabanqaabin fasalada xirfada CTE. Fiiri la-taliyaha dugsiga warbixin dheeraad ah

Caafimaadka iyo Jimicsi Caafimaadka iyo Ciyaaraha Jir-dhiska)	2.0	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo  1.5 Waxbarashada Jirdhiska  .5 Caafimaadka	Fulinta qaybaha (waxbarashada jirdhiska) waxa looga tanaasuli kara sababo khaas ah awgood sida curyaanimu ama ka qaybagal ciyaarokale. Arinto si kastaba ha ahaatee, Ardaygu waa inuu helaa aqoonta uu u baahanyahay ee maadada jir dhiska ama qaato maadada jimicsiga ama uu dhamaysto OSPI hore u marinta xaalada caafimaadka. RCW 28A.230.50; WAC180-50-135; WAC392-410-136; WAC392-410-310; iyo WAC392-410-340. Ardaygu waa inuu dhameeyo hore u marka xaalada caafimaad ee OSPI xiliga dugsiga sare..
Fanka Farshaxanka	1.0	Farshaxank, Musikada ama Masraxa	Ka dooro korsooyinka fanka, muqalka iyo samaynta farshaxanka ama maadooyinka dhibcaha CTE courses. Fiiri la-taliyaha dugsiga warbixin dheeraad ah
Maadooyinka Doorashada	4.5	Luqada Aduunka iyo/ama madoyinka laga dooranayo kuwa kale	2-3 sano Luqada aduunka looga baahan yahay in aad dhigato ama aad gasho kuleejooyinka afarta sano.
WADARTA DHIBCAHA	20.0		Faylka rasmiga ee Gobolka WA wuxu tusayaa rikoodhka warbixinta fasalada aad qaatay, dhibcaha iyo fasalka.

- Hal dhibic waxay la mid 150 saacadood oo waxbarasho ama dhamaystirka maadooyinka ama koorsooyin kale oo la Ogolaaday Ku Badalka Maadada Waxbarashada yahay. (WAC 180-51-050). Koorsooyinkaas la ogol yahay waxay qoran yihiin buuga wax liis garaynta maadooyinka dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle.
- Ardayda dhamaysted kuna guulaysta taariikhda gobolka tan dowlada loogama baahna in ay qaataan taariikhda Washington. Barashada Dastuurka Maraykanka iyo Gobolka Washington lagama tegi karo sida uu sharciga RCW 28A.230.170, laakiin way qaadan karaan koorsooyinka kale ee u dhigma oo uu ogol yahay digtoorka dugsiga. Taas waxa dheer, ardayda fasalada koow-iyto-banaadka iyo labo-tobanaadka ee ka soo bedeshay gobol kale ee haystey labo derajo ee maadada taariikha ee lagu qalin jebinayo, waxa laga yaabaa in laga daayo taariikhda Gobolka Washington.

**TAXADAR:** Ardayda aadeeyso jaamacadaha 4 sano ah, waxa loo baahan yahay koorsooyin ka badan kuwa lagu qalin jebinayo. Waxa kale oo dheer koorsooyin shaqo iyo qaadasahada imtixaanka u diyaargarowga jaamacada ee SAT ama ACT iyo weliba isku celcelin buundooyinka inta aad heshay. Ka hubi liiska jaamacadaha iyo kosularada dugsiyada sare wixii akhbaar dheeraad ah. Koleejada labada sano uma baahna koorsooyinka dheeraadka ee aan kor ku soo sheegnay. Si kastaba ha ahaatee, waxa xaqiqa ah in ardayda ku qaata maadooyinka adadag dugsiga sare ay ka jaanis fiican xaga doorashada jaamacadaha kuwa kale.

**RUNNING START “BARNAAMIJKA HORAY U BILAAWIDA MAADOOYINKA KULEEJOOYINKA”**

- Ardayda fasalka koow-iyto-banaad iyo labo-iyto-banaad oo leh (dhibcaha buuntada)10 ama ka badan) waxay xaq u leeyihiin in ay dhigtaano fasalada machadyada waxbarashada sare oo lacag la’aan ah kana mid ah kuleejooyinka dadweynaha iyo kuleejooyinka farsamada casriga, iyadoo ardayda helayaan si wadajir ah dhibcaha maadooyinka dugsiga sare iyo kuwa kuleejooyinka isla waqtigaas. Dhibcahaas waxaa si rasmi ah loo aqoonsanayaa goorta ay ardayda ka keenaano diiwaanka dhibcaha kuleejada “official transcript”. Ardayda fasalka labo-iyto-banaad waa in ogsoonyihiin in aynan isku haleeyn kaliyah dhibcaha Running Start si ay ula kulmaan shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare, haddii aynsan horay ardayda u keenin diiwaanka dhibcaha kuleejada xaflada qalin-jabinta ma ka soo qaybgalayaan.
- Wadarta dhibcaha ardayda waa in muraajacad lagu sameeyo simistar kastaba o dugsiga (kana mid ah simistarka xiliga kuleelaha) si loo qiimeeyo ama loo go’amiyo xaq u yeelashada Running Start. Ardayda waxaa dib loo diiwaangalinayaa heerarka fasalada oo ku xiran jadowalka hoos ku qoran:

FASALKA	DHIBCAHA
10 <sup>th</sup> xaaladaha fasalka	5 dhibcaha buuntada
11 <sup>th</sup> xaaladaha fasalka	10 dhibcaha buuntada
12 <sup>th</sup> xaaladaha fasalka	15 dhibcaha buuntada

- ⇒ Xasuusin: Ardayda fasalka labo-iyto-banaad oo diyaar u ah qalin-jabinta Bisha Juun waa in loo diiwaangalyaa xaalada ardayda fasalka labo-iyto-banaad ka hor ka qalin-jabinta dugsiga.

**ARDAYDA GURIGA WAX LAGU BARO “HOME-BASED STUDENTS”**

- Ardayda Home-schooled waxay u badala karaan barnaamijka dugsiga sare waana in ay heestaano diiwaangaliyaan faylka foomka “Declaration of Intent to Provide Home-Based Instruction” **ka hor** inta badalaada. Dugsiga degmada waxay awood u leedahay in ay go’amiyaan heerka fasalka ku haboon iyo heerka koorsooyinka lagu qoraayo, iyo soo saarida dhibcada iyadoo la adeecaayo qodobka sharciga WAC 392-410-340.

2. Ardayda ah ardayda guriga wax lagu baro waxay xaq u leeyihiin fasalada Running Start deegaan dugsiyada sare ee dadweynaha goorata ay ka diiwaangalsan yihiin Degmada, waa in ay yihiin mid u qalmo oo aqoontoodana leh fasalka koow-iyoo-tobanaad ama fasalka labo-iyoo-tobanaad heerka waxbarashada dugsiyada sare.

#### **HEESHISKA XARUMAHA WAXBARASHADA HAY'ADAHA-DHEXDOODA "INTERAGENCY"**

1. Ardayda rabto in ay dhigtaano xarumaha waxbarashada waa in ay ka diiwaangalsan yihiin Xarunta, kuna taal goobtaan 3100 Alaska Street, Seattle, 98108. Shaqaalaha Xarunta waxay kaa cawinayaan diiwaangalinta, ardayga waxbarashada oo u baahan yahay, kuna qorayaan ardayga Xarunta Waxbarida Waxbarashada "Education Learning Center".
2. Xarunta Waxbarida Waxbarashada ardayda waxay dhiganayaan xarunta hal sano waxbarasho ah, waxayna helayaan ugu badnaan ilaa sideed (8) dhibcood waqtigaas.

#### **BARNAAMIJKA U DIYAARINTA FARSAMADA CASRIGA SEATTLE "SEATTLE TECH-PREP PROGRAM"**

Seattle Tech-Prep Program waxay ardayda dugsiyada sare awood u leeyihiin in ay sii joogaano dugsiyada sare isla markaana ay codsadaan in ay helaano dhibcaha barnaamijka ku aadan waxbarashada shahadada "associate degree ama certificate" hal ka mid ah seddexda kuleejooyinka Seattle Community Colleges iyo/ama ansixiyaan maamulka gobolka ee waxbarashada heerka ka sareeyso dugsiyada sare. Akhbaaro dheeraad ah fadlan fiiri barnaamijka iyo goobta shabakadaan "Tech-Prep programs in Seattle Public Schools": <http://www.techprepsattle.org/>.

#### **DHIBCAHA IS-DHAAFSIGA WAXBARASHADA FOG "CORRESPONDENCE" AMA KOORSOONKINKA KULEEJADA**

(WAC 392-410-310 and School Board Policy C16.00)

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay kuu xaqiijinayaan dhibcahaan kaliyaha oo ka mid ah dhibcaha dugsiyada sare looga qalin-jabiyo, dhibcaha is-dhaafsigaa ama kuwa aan aheeyn koorsuoyinka laga qaato non-Running Start kana mid ah: (1) Dugsiyada xubin ka ah National University Continuing Education Association ama dhibcaha loo oqoonsan yahay waxbarashada or accredited Distance Education and Training Council; (2) kuleejooyinka community colleges, technical colleges, afarta sano kuleejooyinka iyo jaamacadaha (oo ah kuwa dadweynaha ama kuwa gaarka ah), oo ansaxiyey sigaar ah dugsiyada sare gobolka Washington; iyo (3) dugsiyada ama machadyada kale kana mid ah dugsiyada ama barnaamijyada farsamada korontadaama la ogolaaday oo horay loo ansaxiyey, lana qiimeeyey maadooyinka laga bixiyey Agaasimaha guud ama qorsheeyey ama maamulka hay'adda OSPI Digital Learning Department liiska oo ansaxiyey. Goorta la amaal-marinaayo dhibcaha dugsiyada sare sida kuursuoyinka, waa in ay saldhig u tahay qodobada heerarka soo socdo:

1. Maadooyinka waa in laga qaataa goorta ardayga dhiganaayo Dugsiyada Dadweynaha Seattle.
2. Qoraal oo ogolaaday maamulaha dugsiyada sare ka hor inta aan la bixin ama la qaadan maadooyinka
3. Qoraal ogolaasho waa in oo la socdaa maadooyinka dhibcaha lagu siiyey nambarka dhibcaha oo helaayo.
4. Qoraal rasmi ah ee taraskiribka goorta la siiyo ardayga ka dib waa in maamulaha dugsiyada ama qof loo xil-saaray amaal-marinta dhibcaha kaliyaha ay bixiyaan.

#### **DHIBCAHA WAXBARASHADA DAD-BAN MAADOOYINKA LA BARANAAYO**

(WAC 392-121-107 and School Board Policy C04.00)

Ardayda waxay helayaan dhibcaha maadooyinka laga barto waxbarashada dad-ban, kana mid ah Alternative Learning Experiences (ALEs), Running Start, National Guard service, ama ay kormeerayn isla markaana ay ogolaadeeyn barashada waayo-aragnimada dugsiyada sare, shaqo saldhig u ah barashada, iyo maadooyin ay bixiyeyn dugsiyada ama machadyada sida gaarka ah loo ansaxiyey degmada; waayo-aragnimada barashada oo sameeyey qof aan aheeyn shaqaalaha dugsiyada degmada. Inta badan dhibcaha lama siiyo ka qaybgalayaasha barnaamijyada waxbarashada qof aan aheeyn ama ururo ka baxsan degmada dugsiyada. Qaabka la raacaayo in la ansaxiyo dhibcaha dhamaan maadooyinka dhibcaha waxbarashad dad-ban kana mid ah:

1. Ansixin ka qaybgalka waayo-aragnimada siinta dhibcaha waa in la helaa ka hor. Qorshaha ogolaashaha waa in oo ka mid yahay akhbaarahaan:
  - a. Magaca barnaamijka, taalka maadooyinka iyo nambarka qoraalka ka yimid Catalog of Secondary School Subjects oo ah barashada waayo-aragnimada si qeexan loo sameeyey kuna xiran dhibcaha loo siinaayo amaal-marinta
  - b. Muddada waqtiga la ansaxinaayo in la soo dhameystiro
  - c. Barnaamij ujeedo leh, lana ogyahay nuxukiisa, iyo/ama waxbarida waxqabad leh oo weyn, ashyaada waxbarida loo isticmaalay haddii ay tahay waayo-aragnimada waxbarashada dad-ban haddii aysan ka mid aheeyn maadooyinka dhibcaha la amaal-marinaayo.
  - d. Nambarka dhibcaha oo helaayo ama la siinaayo.
2. Waxyaalaha kale looga baahan yahay, kana mid Qorsha Waxbarida Ardayga "Student Learning Plan", waa mid muhiim ah ee ALEs. Fiiri Siyaasada Gudiga Sare Dugsiyada School Board Policy C04.00.
3. Maamulaha dugsiyada, waa in oo latashdaa la-taliyaha dugsiyada, waana in ay ogolaadaan madaxa hay'adda ku haboon goorta ay muhiimka tahay, waa in la ansixiyaa qorshaha barnaamijka si qoraal ah ka hor inta la bilaawin waayo-aragnimada ama waxqabadka dhibcaha la codsanaayo.

4. Dhibcaha waa in lagu amaal-mariyo ka dib taranskiribtiga rasmiga ah oo maamulaha lala xariiray. Haddii taranskiribtiga rasmiga ah oo aan la sameeyn maadooyinka waxbarashada dad-ban la baraayo, waa in la qiimeeyaa waxqabadka ardayga la qiimeeyey in la siiyo amaal-marinta dhibcaha la siinaayo waa in laga taxadiraan ansixinta.
5. Ansixinto ma la xaqiijinaayo barnaamijka ka qaybgalayaasha kana mid ah ka qaybgalayaasha iyadoo saldhig looga dhigaayo jinsiyad, midabka, asalka kooxda, diinta ama curyaanimada.

**SHAHAADADA CILMIGA AMA AQOON GAARITAANKA SHAQSIGA e “CERTIFICATE OF ACADEMIC OR INDIVIDUAL ACHIEVEMENT”**

Ardayda ku guulaystaan akhriska, qoritaanka IYO xisaabta waxay helayaan shahaadada Certificate of Academic Achievement (CAA) oo gobolka bixiyey kana baxsan dokumentiga lagu soo ururiyey macluumaadka in oo ku guulaystay dhamaan 3 maado ee intixaanada gobolka. Ardayda helayso u adeega Waxbarashada Gaarka ah waxay la mid yihiin isku qiimeeyn: hase ahaatee waxay leeyihiin kala doorasho dheeraad ah intixaanada oo ikhtiyaar ah loona diyaariyey heerka fasalada 11 iyo 12<sup>th</sup>. Ardayda helayso u adeega Waxbarashada Gaarka ah kuna guulaystaan akhriska, qoritaanka IYO xisaabta iyadoo isticmaalaayo kala doorashada intixaanada waxay gobolka ka helayaan shahaadada Certificate of Individual Achievement (CIA) . Labadaba CAA iyo CIA waa laga aqoonsan yahay gobolka in ay ku guulaysteeyn intixaanada akhriska, qoritaanka iyo xisaabta. Ardayda loogama baahno shuruudaha qalin-jabinta gobolka iyo dokumentiga degmada. Ardaydaan lagama rabo in ay helaano shahaadada diploma.

**KA TANAASULAADA AMA KA CAFINTA SHURUUDAHA QALIN-JABINTA DEGMADA DUGSIYADA SARE “WAIVER OF DISTRICT HIGH SCHOOL GRADUATION REQUIREMENTS”**

1. Dhigashada afarta sano (fasalada 9-12) waa mid aad ugu muhimsan ka qalin-jabinta. Maamulaha dugsiga wuxuu ka tanaasuli karaa shuruudaha qalin-jabinta degmada ee shaqsiyaadka arday gaar ah goorta ay la adeeco waxbarashada iyo/ama sababo dhibaato adag oo dokumeenti leh.
2. Degmooyin gaar ah waxay ka tanaasulayaan shuruudaha looga baahan yahay qalin-jabinta shaqsiyaad arday gaar ah. Laakiin SHURUUDAHA GOBOLKA LAGAMA TANAASULAAYO (tusaale, lagama tanaasulaayo shuruudaha ugu yaraanta dhibcaha, Mashruuca Isku-keenida iyo Qorshaha Dugsiga Sare oo dheeraad ah) ilaa mooyee halka gobolka sharciga gobolka ogol yahay (tusaale, ka qalin-jabinta dhameystiran IB Diploma, ka tanaasulaada dhibcaha Jimicsiga (Ciyaraha qaabka jirka) oo keena curyaanimada, shaqaalayn ama aaminaadta diin, ama si tuus ah ugu qaybgalaayo ciyaaraha ama cilmiga sayniska ciidamada, ama tabar gaar ah ciidanka ama sababa kale oo suurtagal fiican).
1. Qaabka soo socdo waxaa loo isticmaalaaya ka tanaasulaada ama cafiska shuruudaha looga baahan yahay ka qalin-jabinta degmada:
  - ⇒ Ardayda dooneeyso ka tanaasulaada waxay u keenayaan warqad la-taliyaha dugsiga ayna soo saxiixayn waalidiinta ama wakiilada. Goorta ardayga gaaro da’da 18 jirka, ardayga ayaa saxiixanaayo.
  - ⇒ La-taliyaha dugsiga wuxuu ogaysiinayaa maamulaha dugsiga si si oo ugu codsado tanaasulaada.
  - ⇒ La-taliyaha dugsiga wuxuu la-tashanayaa oo weydiinayaa qoraal talo-siinta madaxa hay’adda ku haboon iyo talo-siin kana mid ah fikradaha ku saleysan iyo cadeeynta heerka waxqabadka ugu yar goobaha saldhiga u ah xariirka iyo xirfada heerka xisaabinta aqoon gaaritaanka.
  - ⇒ Maamulaha dugsiga wuxuu ogolaan karaa ama diidi karaa ka tanaasulaada ama wuxuuna sameeyn karaa go’aan gaarida ku saabsan codsiga go’aanka fikradaha, maamulaha wuxuu kala xariirayaa ga’aanka ardayga iyo Agaasimaha Guud ee Deegaanka.

Formatted: Bullets and Numbering

**Akhbaaraha dheeraadka ah la soo xariir la-taliyaha dugsiga ama u tixraac qoraalka rasmiga ah Degmada K-12 Qoraalka Buuga La-talinta, kaas oo ka turjumaayo isbadalka ugu dambeeyo sharciga qaynuunka iyo siyaasada.**

**SIYAASADA**

Dugsiyadda Dadweynaha Seattle wuxuu bixiyaa Isku Midka Fursadda Waxbarashada iyo Fursadda Shaqaalaynta iyadoo loo fiirinaynin jinsiyada, caqiidada, midibka, diinta, asalkadalka, heerka dhaqaalaha, heerka guurka, muqaalka qofka, dhimirka, jirka ama u dareenkacuryaanimada. Degmada waxay raacaysaa dhamaan sharciyada iyo qaynuunka Gobolka iyo Is-bahaysiga Dowladda kana mid ah, laakiin la xadidin Title IX, Title VI Qodobka Xaqa Dadweynaha, Qaybta 504 Qodobka Dhaqan-celinta, RCW 49.60 “Sharciga Ka Soo Horjeedo Kala IYO RCW28A.640 Isla-ega jinsiyada, qarinta laakiin mala xadidin. Dhamaan barnaamijyada, kuusooyinka, waxqabadka, u adeega, helitaanka ama galitaanka dhismayaasha iyo wixii la mid ah. Sargaalka ka wakiilka ah Title IX iyo 504 Xariiriyaha guud wuxuu mas’uul ka yahay qiimeynta, la xisaabtamida iyo hubinta in siyaasada la fuliyey: Office of Equity and Compliance, 2445 3<sup>rd</sup> Avenue S., Seattle, WA 98124-1165.